

# Cod Bixinta 101

Maclumaadka Doorashada la Siiyo Cod  
Bixiyeyasha Cusub

## Yaa xaq u leh in uu dhiibto codkiisa?

Gobol kasta wuxuu leeyahay sharchiyo u gaar ah oo ku saabsan qofka loo ogol yahay in uu codeeyo. Guud ahaan, waa in ahaatid:



- Muwaadin u dhashay Mareykan
- Qofka daggan bulshada aad adiga dooneysid in aad codkaada ka dhiibatid (marmar waqtiga ugu yar)
- Ugu yaraan 18 sanno (bulshadaha qaar, waxaa isdiiwaan geli kara dadka ka yar 18 sanno, kuwaasoo codkooda ka dhiiban kara qaar ka mid ah doorashooyinka deegaanka ama doorashooyinka musharaxiinta xisbiyada)



Gobolada qaar, balse ma aha dhamaan, waxaa dhici karto in dadka qaar laga joojiyo cod bixinta taasoo ugu wacan dambi culus ay horay u galeen, go'aan ka soo baxay maxkamadda, ama wax kale. La xariir sarakiisha gobolkaada ama deegaankaada haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan xaq u leedahay in aad codkaada dhiibatid. Si aad u heshid sarakiisha doorashada deegaanka, waxaad tagi kartaa [www.vote.gov](http://www.vote.gov).

## Cod Bixinta 1-2-3

1

### Is diiwaan geli si aad u dhiibatid codkaada



Inta ugu badan gobolada waxay cod bixiyeyasha ka dalbadaan in ay isdiiwaan geliyaan ka hor inta aysan dhiibarin codkooda. Waxaad maclumaadka gobolkaada, sida taariikhda ugu dambeeyso diiwaan gelinta cod bixiyaha, ka heli kartaa bogga internetka [www.eac.gov/vote](http://www.eac.gov/vote).

- **Internetka** - Gobolada qaar waxaa laga helaa diiwaan gelinta cod bixiyaha internetka, ama waxay kuu ogoladaan in aad internetka ka hubsatid xaaladda ay ku sugaran tahay diiwaan gelintaada. Waxaad maclumaadka gobolkaada ka heli kartaa [www.eac.gov/vote](http://www.eac.gov/vote).  
-ama-
- **Qof ahaan**, waxaad iska diiwaan gelin kartaa xafiiska sarkaalka doorashooyinka deegaankaada.  
-ama-
- **Ku dirista boostada** - Waad saxiiji kartaa kaddibna waxaad foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha ku soo celin kartaa boostada. Waxaad halkaan ka heli kartaa tilmaamo u gaar ah gobolka iyo foomka diiwaan gelinta cod bixiyaha oo lagu tarjumay 21 luqad: [www.eac.gov/voters/national-voter-registration-form](http://www.eac.gov/voters/national-voter-registration-form).

2

### Xogogaal noqo

Sarakiisha doorashada gobolka iyo deegaanka waa ilaha aad loogu kalsoon yahay ee laga helo maclumaadka cod bixinta rasmiga. Sarakiisha doorashada deegaanka waxay xaqijin karaan xaaladda ay ku sugaran tahay diiwaan gelintaada, iyo waxay bixin karaan maclumaadka ku saabsan goorta iyo meesha aad codkaada ka dhiiban kartid. Waxaa kaloo dhici karto in sarkaalka doorashada deegaankaada, in uu tusaale ahaan ku siiyo warqadda cod bixinta ama maclumaad kale oo ku saabsan xafiisyada ama arrimaha ku qornaan doono warqadaada cod bixinta.



Bogga 1 / 2




Guddiga Kaalmada Doorashada Mareykanka

633 3rd Street NW, Suite 200 | Washington, DC 20001

[www.eac.gov](http://www.eac.gov)

## 3

## Dhiibo codkaada!



### Qof ahaan dhiibo codkaada

- Hel goobta cod bixinta laguugu qoray.
- Hubso waqtiyada ay furan yahiin goobaha cod bixinta gobolkaada. Hubso in aad haysatid wax kasta aad u baahan tahay.

Marka aad timaadid goobta cod bixinta:

- Wuxaan iska xaadirin doontaa shaqaalaha goobta doorashada kaasoo hubsan doono in aad xaq u leedahay in lagu siiyo warqadda cod bixinta. Gobolada qaar, waxaa dhici karto in aad u baahatid in aad muujisid aqoonsiga sawirka ay dawladda soo saarto (ID) ka hor inta aan lagu siinin warqadda cod bixinta.
- Waxaa lagu siin doonaa warqadda cod bixinta halkaas aad kala soo bixi kartid xullahadaada. Haddii aad qalad ku samaysid warqadaada cod bixinta, waxaa codsan kartaa in laguu baddalo warqadda cod bixinta. Kaddib marka aad dhamaysid calaameynta warqadda, waxaa dhiibban doontaa warqadaada cod bixinta. Kaddib marka aad dhiibatid warqadaada cod bixinta, codkaada waxaa la gelin doonaa diiwaanka.

### Cod bixinta lagu diro boostada

Hadba sida ku xeran gobolkaada, waxaa dhici karto in aad xaq u yeelatid in warqadda cod bixinta laguugu soo diro boostada. Ka hubso sarkaalka doorashada deegaankaada si aad u ogaatid sida boostada laguugu soo diro warqadda cod bixinta, goorta iyo goobta aad ku soo celin kartid warqadaada cod bixinta, iyo sida aad boostada kala socotid warqadaada cod bixinta.



### Gelitaanka



Haddii aad qof ahaan dhiibaneysid codkaada, ama aad ku direysid boostada, waxaa weydiisan kartaa kaalmo marka aad dhiibaneysid codkaada. Waxaa dhici karta in maamulada qaar bixiyaan warqadaha cod bixinta iyo qoraalo ku saabsan cod bixinta oo ku qoran luqado aan ahayn Ingiriisi.

## Sidee ayaad u kaalmeyn kartaa?

Cod bixiye kasta wuxuu kaalmo ka geysan karaa in doorashooyinka ahadaan kuwo xaq ah, sax ah, oo sugaran. Halkaan waxaad ku arki doontaa qaar ka mid ah siyaabaha aad u kaalmeyn kartid:



- Isku qor si aad codkaada u dhiibatid islamarka aad xaq u yeelatid.
- Haayo maclumaadkaada cod bixinta ee ugu dambeeyo. La xariir sarkaalka doorashada deegaanka haddii wax iska badalaan magacaada, cinwaankaada, ama xisbiga aad raacsan tahay.
- Waxaa maclumaadka ku saabsan habka cod bixinta ka xaqiijisan kartaa ilaha lagu kalsoon yahay.

Ugu dambayn, sida ugu fiican aad kaalmo uga geysan kartid waxay tahay in aad isku qortid kana mid noqtid shaqaalaha goobta lagu qabto doorashada. Doorashooyinka waxay isku haleyaan tobanaan kun dad adiga kula mid ah si ay ugu adeegaan bulshadooda. La xariir sarakiisha doorashada deegaankaada si aad in badan uga ogaatid fursadaha adeegga loo qabto bulshadaada. Halkaan waxaad ka heli doontaa maclumaadka gobolkaada: <https://www.eac.gov/help-america-vote>.